## *JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA*

## *DAWLAD GOBALEEDKA GALMUDUG*

# *SHARCIGA GUDDIGA MADAXA BANNAAN EE DOORASHOOYINK GALMUDUG*

**Sharci Lr. 19/ 2022**

***Dhusamareb, September 2022***

## Tusmada Sharciga

**CUTUBKA 1AAD** ..... **2**
Qodobka 1aad: Magaca Sharciga ..... 2
Qodabka 2aad: Eray Bixin ..... 2
Qodobka 3aad: Baaxadda Adeegsiga Sharciga ..... 2
Qodobka 4aad: Ujeedada Sharcigan ..... 2
Qodobka 5aad: Saldhiga Sharcigan ..... 2
Qodobka 6aad: Mabaa’diida Guud Ee Sharcigan ..... 2
**CUTUBKA 2AAD** ..... **3**
Qodobka 7aad: Qaab-Dhismeedka İyo Hannaanka Maamul Ee Guddiga Madaxa Bannan Ee Doorashooyinka Galmudug ..... 3
Qodobka 8aad: Shaqsiyadda Qaanuuneed Ee Guddiga ..... 3
Qodobka 9aad: Hannaanka Loo Soo Magacaabayo Guddigan ..... 3
Qodobka 10aad: Shuruudaha Xubinnimada Guddiga Doorashooyinka ..... 3
Qodobka 11aad: Xarunta Guddiga ..... 4
Qodobka 12aad: Muddo Xileedka Guddiga Doorashooyinka Galmudug. ..... 4
Qodabka 13aad: Waayidda Xubinnimada Guddiga ..... 4
Qodobka 14aad: Buuxinta Xubinta Bannaanatay. ..... 4
Qodobka 15aad: Awoodaha Guddiga Doorashooyinka ..... 5
Qodobka 16aad: Qaab-Dhismeeedka Guddiga ..... 5
Qodobka 17aad: Xilka Iyo Awoodaha Guddoomiyaha ..... 6
Qodobka 18aad: Xilka Guddoomiye Kuxigeenka Guddiga Doorashooyinka ..... 6
Qodobka 19aad: Xilka Xoghayaha Guud Ee Guddiga ..... 6
Qodobka 20aad: Xeer Hoosaadka Guddiga ..... 6
Qodobka 21aad: Kulamada İyo Habraaca Go’aannada Guddiga ..... 7
Qodobka 22aad: Xasaanadda Guddiga ..... 7
**CUTUBKA 3AAD** ..... **3**
Qodobka 23aad: Miisaaniyadda Guddiga. ..... 8
Qodobka 24aad: Xilka Ay Qaban-Karaan Xubnaha Gudigu. ..... 8
Qodobka 25aad: Dhaarinta Guddiga ..... 8
Qodobka 26aad: Dhaqanka Shaqo Wanaaga Guddiga ..... 8
Qodobka 27aad: Warbixinta Guddiga ..... 8
Qodobka 28aad: Keydinta Xogta İyo Macluumaadka ..... 9
Qodobka 29aad: Talo Bixin Sharciyeed ..... 9
Qodobka 30aad: Burin Sharci ..... 9
Qodobka 31aad: Dhaqan Galkasharcigan ..... 9
Lifaaqa 1aad: Dhaqan Wanaaga Laga Rabo Xubnaha Guddiga Doorashooyinka İyo Hawl-Wadeenadiisa ..... 9

**CUTUBKA 1AAD**
**QODOBKA 1AAD**
**MAGACA SHARCİGA**

Magaca Sharcigan waa Sharciga dhismaha Guddiga Madaxa Bannan ee Doorashooyinka Dawlad Gobaleedka Galmudug.

**QODABKA 2AAD**

***ERAY BİXİN***

Eray bixintan waxaa loola jeedaa fasiraada ku hor qoran magacyada hoos ku xusan:

1. Sharci: Waxaa loola jeedaa Sharciga lagu dhisay Guddiga Madaxa Bannan ee Doorashooyinka Galmudug
2. Guddiga: Waxaa loola jeedaa Guddiga Madaxa Bannan ee Doorashooyinka Galmudug
3. Dawladda: Waxaa loola jeedaa Dawlad Gobaleedka Galmudug
4. Doorashooyinka: Waxaa loola jeedaa Doorashoooyinka Dawlad Gobaleedka Galmudug
5. Guddoomiye: Waxaa loola jeedaa Guddoomiyaha Guddiga Madaxa Bannan ee Doorashooyinka Galmudug
6. Madaxweynaha: Madaxweynaha Dawlad Gobaleedka Galmudug
7. Baarlamaan: Waxaa loola jeedaa Baarlamaanka Dawlad Gobaleedka Galmudug

**QODOBKA 3AAD**

**BAAXADDA ADEEGSİGA SHARCİGA**

Sharcigan waxaa lagu dhisayaa Guddiga Madaxa-Bannan ee Doorashooyinka Dawlad Gobaleedka Galmudug.

**QODOBKA 4AAD:**

**UJEEDADA SHARCİGAN**

Ujeedada Sharcigan waa in lagu dhiso Guddiga Madaxa Bannan ee Doorashooyinka Dawlad Gobaleedka Galmudug.

**QODOBKA 5AAD**

**SALDHİGA SHARCİGAN**

Saldhiga Sharcigan waa qodobka 68aad, faqradiisa 4aad, xarafkiisa C ee Dastuurka Dawlad Gobaleedka Galmudug

**QODOBKA 6AAD**
**MABAA'DİİDA GUUD EE SHARCİGAN**

Guddigan inta uu ku guda jiro fulinta waajibaadkiisa shaqo waxa uu u hoggaan-samayaa mabaa'diida guud ee ay kamid yihiin:

1. İlaalinta midnimada iyo wadajirka Dawlad Gobaleedka Galmudug

2. Ilaalinta nidaamka dimoqoraadiga ee Galmudug
3. Ilaalinta xuquuqda siyaasadeed ee xaqa ay u leeyihiin dhammaan muwaadiniinta Somaaliyed ee reer Galmudug.
4. Ilaalinta hufnaanta iyo xornimada doorashooyinka Galmudug
5. In ay waajibaadkooda shaqo u gutaan si madax Bannan oo dhexdhexaad ah.

## CUTUBKA 2AAD
## QODOBKA 7AAD
## QAAB-DHİSMEEDKA İYO HANNAANKA MAAMUL EE GUDDİGA MADAXA BANNAN EE DOORASHOOYİNKA GALMUDUG

Si waafaqsan Qodobka 68aad, faqradiisa 4aad, xarafkiisa C ee Dastuurka Dawlad Gobaleedka Galmudug, Sharcigan waxaa lagu dhisayaa Guddiga Madaxa Bannaanee Doorashooyinka Dawlad Gobaleedka Galmudug.

## QODOBKA 8AAD:
## SHAQSİYADDA QAANUUNEED EE GUDDİGA

1. Guddigu waxa uu leeyahay shaqsiyad qaanuuneed oo uu ku saxiixi karo heshiisyo leh awood qaanuuneed oo u fududeynaya gudashada hawlahalagama maarmaanka u ah shaqadiisa.
2. Guddigu waxa uu samaysanaya astaan iyo shaabad u gaar ah.

## QODOBKA 9AAD:
## HANNAANKA LOO SOO MAGACAABAYO GUDDIGAN

1. Xubnaha Guddiga Doorashooyinku waxa ay ka koobanyihiin **(7) Todobo** Xubnood waxaana soo Xulaya soona gudbinaya Wasaaradda Arrimaha Gudaha Galmudug.
2. Xubnaha Guddiga ee Wasaaraddu soo gudbisay waxaa la horgeynayaa Xukuumadda (Golaha Wasiirada) oo cod aqlabiyad ah ku ansixinaya.
3. Baarlamanka Dawlad Gobaleedka Galmudug ayaa siinaya Codka Kalsoonidasi waafaqsan qodobka 68aad faqaradiisa 5aad ee Dastuurka Dawlad Gobaleedka Galmudug.

## QODOBKA 10AAD
## SHURUUDAHA XUBİNNİMADA GUDDİGA DOORASHOOYİNKA

Xubin kasta oo reer Galmudug ah ee buuxisa shuruudaha hoos ku qoran waxaa loo soo xuli karaa ka mid noqoshada Guddigan:

1- In uu yahay Muwaadin Somaaliyed, reer Galmudug ah, da'diisuna ka weyn-tahay 25 sano
2- In uu leeyahay aqoon heer Jaamacadeed

3- In uu leeyahay khibrad shaqo ugu yaraan 5 sano ah
4- In uusan/aysan xubin ka ahayn ururro Siyaasadeed iyo kuwo Bulsho
5- In uusan/aysan kamid ahayn Shaqaalaha Dawladda Federalka amaGalmudug.
6- In lagu yaqaanno anshax wanaagsan iyo dhaqan suuban bulshadadhexdeeda.
7- In aysan Maxakamadi danbi ku xukumin 5tii sano ee ugu dambeysay
8- In uu Maskaxiyan iyo Jismiyan uu fiyow-yahay shaqadana gudan karo.

**QODOBKA 11AAD**
**XARUNTA GUDDİGA**

1. Xarunta Dhexe ee Guddiga Doorashooyinka Galmudug waa Caasimada Dawlad Gobaleedka Galmudug ee Dhusamareb, waxa uuna xarumo kale ku yeelan karaa dhammaan degmooyinka iyo gobalada dawlad Gobaleedka Galmudug.

**QODOBKA 12AAD**
**MUDDO XİLEEDKA GUDDİGA DOORASHOOYİNKA GALMUDUG.**

1. Muddada xil haynta Guddiga Doorashooyinka Galmudug waa shan (5) sano, waxaana loo cusbooneysiin karaa hal (1) mar oo kali ah

**QODABKA 13AAD**
**WAAYİDDA XUBİNNİMADA GUDDİGA**

Xubinnimada Guddiga waxaa lagu waayi karaa:

1. In Xubintu dhimato.
2. In xubintu ay is casisho.
3. In xubinta ay caafimaad darro la soo gudboonaato.
4. In xubnaha Guddiga ay cod hal dheeri ah (50%+1) ku ogolaadaan in xubintu ay jebisay xeer hoosaadka iyo anshaxa dhexdhexaad-nimada guddiga.
5. In xubinta ay Maxkamadi ku xukuntay xukun kama dambeys ah.

**QODOBKA 14AAD**
**BUUXİNTA XUBİNTA BANNAANATAY.**

Marka xubin ka mid ah guddiga ay baneyso xubinimadeeda waxaa soo magaacabaya Wasiirka Arrimaha Gudaha waxaana la marinayaa Hannaankii lagu soo dhisay Guddiga Doorashooyinka Galmudug.

## QODOBKA 15AAD
## AWOODAHA GUDDİGA DOORASHOOYİNKA

Guddiga Dorashooyinka Galmudug waxa ay awood buuxda u leeyihiin:

1. Maamulka, isku dubaridka, abaabulka, qabashada doorashooyinka golayaasha Deegaanka, golaha Baarlamaanka iyo Doorashada Madaxweynaha ee Maamulka Dawlad Gobaleedka Galmudug iyo wixii kale ee uu sharcigu siinayo.
2. Diyaarinta Qorshaha guud ee heerarka kala duwan ee Doorashooyinka Dawlada Gobaleedka Galmudug.
3. Maamulida iyo qorsheynta miisaaniyada Doorashooyinka.
4. Wacyi-gelinta dadweynaha ee arrimaha ku saabsan xaqa dastuuriga ah ee Qofka in la doorto ama uu wax doorto.
5. Magaacibidda iyo shaqo ka eryida howl-wadeenada doorashada ee Degmooyinka iyo Gobalada.
6. Xaqiijinta amniga goobaha doorashada iyo hawl-wadeenadaba.
7. Cayimida waqtiga doorashada.
8. Diiwaan gelinta Xisbiyadda siyaasada.
9. Dhammaan hawlaha la xiriira doorashooyinka sida diiwaan-gelinta codbixiyaasha,
10. Dajinta xeerarka Nidaaminaya anshax-marinta iyo korjoog-teynta xisbiyada siyaasadeed
11. Soo saarida habraacyada iyo xeerarka lagama maarmaanka ah sida kan codbixiye-yaasha, musharraxiinta, xarumaha codbixiye-yaasha iyo habraacyada cod-tirinta.
12. Guddigu waxa uu u bandhigayaa dadweynaha magacyada musharraxiinta doorashada, warqadaha doorashada, natiijada kama danbeysta ah ee doorshada iyo arrin kasta oo muhim u ah in ay dadweynaha lala socodsiiyo.
13. Xallinta khilaafyada ka yimaada doorashada.Guddigu waxa uu soo saarayaa qoraallo iyo wacyi galin dadweyne. İyo wixii kale ee sharcigau u ogol yahay.

## QODOBKA 16AAD
## QAAB-DHİSMEEEDKA GUDDİGA

1. Guddigu waxa uu yeelanayaa Guddoomiye, Guddoomiye kuxigeen ay xubnaha Guddigu iska dhex-dooranayaan.
2. Guddoomiyaha iyo Gudddomiye kuxigeenka waxaa lagu dooranayaa cod hal dheeri ah (50%+1) tirada guud ee xubnaha Guddiga.
3. Xog-haya guddiga waxaa soo magacaabaya guddoomiyaha Guddiga waxaana ogolaanaya xubnaha Guddiga.

**QODOBKA 17AAD**
**XILKA IYO AWOODAHA GUDDOOMIYAHA**

Guddoomiyaha guddiga doorashooyinku waxa uu mas'uul ka yahay:

1- Isugu yeerida iyo guddoominta kulamada guddiga.
2- Hubinta qorshe-hawleedka guddiga.
3- Xoojinta xiriirada guddiga kala dhaxeeya qeybaha kale ee dawladda Galmudug.
4- Fulinta wixii waajib kale ah ee uu sharcigu u xilsaarayo.

**QODOBKA 18AAD**
**XİLKA GUDDOOMİYE KUXİGEENKA GUDDİGA DOORASHOOYİNKA**

Guddoomiye ku-xigeenka Guddiga Doorashooyinku waxa uu mas'uul ka yahay arrimaha hoos ku xusan:

a) In uu qabto/qabato waajibaadka shaqo ee Guddoomiyaha marka uu maqanyahay ama ay ku timaado xaalad xil gudasho la'aaneed joogta ah
b) Hawl-kasta ee uu u xilsaaro Guddoomiyaha Guddigu.

**QODOBKA 19AAD**
**XİLKA XOGHAYAHA GUUD EE GUDDİGA**

1. Xoghayaha Guud waxa uu mas'uul ka yahay arrimaha hoos ku xusan:
   A. Waa madaxa maamulka Guddiga mas'uulna ka ah hagidda hawlaha xoghaynta
   B. Waxa uu mas'uul ka yahay xafiisyada Doorashooyinka iyo arurinta talooyinka ugu habboon habka maamulka Doorashooyinka
   C. Waxa uu ku shaqeynayaa awaamirta Guddiga, waxa uuna siinayaa warbixin joogta ah
   D. Waxa uu fulinnayaa go'aannada Guddiga
   E. Kormeeridda iyo hagidda habsami u socodka shaqada Guddiga
   F. Waxa uu mas'uul ka yahay keydinta dukumiintiyada Guddiga.
   G. Iyo Howl-kasta ee uu sharcigan u ogol yahay

**QODOBKA 20AAD**
**XEER HOOSAADKA GUDDİGA**

1. Guddiga Madaxa Bannan ee Doorashooyinku waxa uu yeelanayaa xeer hoosaad lagu maamulayo hawlaha Guddiga iyo dhaqan gelinta qodobada sharcigani qeexayo
2. Iyada oo aan waxba loo dhimayn, Faqrada 1aad ee Qodobkaan xeer hoosaadka guddiga waxaa ka mid ah:

A. Magacaabista, ansixinta iyo awood siinta xubnaha xafiisyada hoos yimaada mas'uuliyadda Guddiga Madaxa Bannan ee Doorashooyinka si wafqsan sharcigan
B. Ka qaadista tallaabo anshax marin sarkaal kasta ama wakiil kasta oo ka tirsan xafiis hoosna imaanaya mas'uuliyadda Guddiga si wafaqsan sharcigan
C. Baabi'in jago horey loo magacaabay ama shaqo ka fadhiisin shaqaale xafiis hoos yimaada mas'uuliyadda Guddiga si waafqsan sharcigan
D. Dejinta habraaca goobaha Doorashooyinka Galmudug
E. Fulinta nooca doorasho iyo habraaceed ee uu Guddigu u soo gubiyo Madaxweynaha Galmudug

## QODOBKA 21AAD
## KULAMADA İYO HABRAACA GO'AANNADA GUDDİGA

1. Kulamada Guddiga waxa ay ku qabsoomayaan markii uu Kooramku dhan yahay aqlabiyad hal dheeri ah (50%) tirada xubnaha Guddiga.
2. Dhammaan kulamada Guddiga waxaa shir guddoominaya guddoomiyaha Guddiga, marka uu maqan yahayna waxaa shir guddoominaya ku- xigeenkiisa.
3. Go'aamada Guddiga waxa ay ku ansaxayaan cod hal(1) dheeri ah tirada guud ee xubnaha Guddiga (50%+1).
4. Marka codaynta ku xusan Faqrada 2aad ay noqoto is barbardhac, Guddoomiyaha ayaa codeynaya.

## QODOBKA 22AAD
## XASAANADDA GUDDİGA

1. Xubnaha Guddiga iyo hawl-wadeennadooda laguma soo oogi karo dacwad madani ah ama mid xeer ciqaabeed ah oo la xariirta shaqadooda inta ay gudanayaan hawshooda
2. Dhismaha iyo xafiisyada Guddiga Doorashooyinka lama baari karo iyada oo aan ogolaansho laga helin Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud.

## CUTUBKA 3AAD

## QODOBKA 23AAD

## MİİSAANİYADDA GUDDİGA

1. Guddigu waxa uu yeelanayaa miisaaniyad u gaar ah oo ka mid ah miisaaniyadda guud ee Dawlad Gobaleedka Galmudug.
2. Guddigu waxa uu u madaxbannan yahay maamulidda miisaaniyadda loo qoondeeyey si waafaqsan shuruucda maaliyadda ee dawladda Galmudug.

## QODOBKA 24AAD:
## XILKA AY QABAN-KARAAN XUBNAHA GUDİGU.

1. Xubnaha Guddigu ma qaban karaan xil kale inta ay hayaan xilka xubinimada Guddigan.
2. Xubin kasta oo ka mid ah Guddigan oo dooneysa in ay ku biirto siyaasadda waa in ay iska casishaa xubin-nimada Guddiga ka hor lix (6) bilood inta aysan xil-siyaasadeed isku sharraxin.
3. Xubin kasta oo ka mid ah Guddigan marka loo dhaariyo xubinimada Guddigan waxauu waayayaa xilkasta ee uu horey u hayey.

## QODOBKA 25AAD
## DHAARİNTA GUDDİGA

1. Inta aysan qaban xilka xafiiska dhammaan xubnaha Guddigan waxaa dhaarinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, dhaartuna waa sida hoos ku xusan:
2. *(*Waxaan Ku Dhaaranayaa Magaca Iıaahey İn aan Xilkeyga U Guto Si Daacad Ah Oo Ay Ku Jirto Danta Diinta, Dalka Iyo Dadka Reer Galmudug Dhawrana Dastuurka Galmudug İyo Shuruucda Kale Ee Dalka U Yaalla)

## QODOBKA 26AAD
## DHAQANKA SHAQO WANAAGA GUDDIGA

Guddiga iyo dhammaan hawl- wadeenadiisa waxaa waajib ku ah in ay ilaaliyaan dhaqan wanaagga shaqo ee lagu tilmaamay lifaaqa koowaad (1aad) si loo hubiyo in ay hawlahooda u gutaan si madax bannaan oo daacadnimo, hufnaan iyo foojignaan ku dheehantahay isla markaana ka fog eex

## QODOBKA 27AAD
## WARBİXİNTA GUDDİGA

Guddigu waxa uu usoo gudbinayaa Golaha Baarlamaanka Galmudug warbixin kalfadhigiiba hal mar (1) .

## QODOBKA 28AAD

## KEYDINTA XOGTA İYO MACLUUMAADKA

1. Guddigu waxa uu daabacayaa isla markaana faafinayaa dhammaan macluumaadka muhiimka ah ee ku saabsan awaamirta iyo talooyinka la xiriiradoorashada ee uu siinaayo shacabka Galmudug.
2. Bixinta macluumaadkaas waxaa la waafajinayaa baahida xafidaadda ama ilaalinta sirta Guddiga.
3. Xubin kasta oo Guddiga ka mid ah iyo hawl-wadeenadiisa waxa ay saxiixayaa heshiis la xariira xagga sirta iyo xafidaadda macluumaadka Doorashooyinka.
4. Guddigu waxa uu baahinayaa macluumaadka lagama-maarmaanka u ah doorashada oo ay ka mid tahay macluumaadka xafiisyada guddiga iyo cinwaanadooda marka uu u arko in ay muhiim tahay

## QODOBKA 29AAD
## TALO BİXİN SHARCİYEED

Guddigu waxa uu weydiin karaa talo sharciyeed Garyaqaanka Guud ee Dawlad Gobaleedka Galmudug, Maxakamadda Sare ee Galmudug iyo khubrada kale ee aqoonta u leh shuruucda Doorashooyinka.

## QODOBKA 30AAD
## BURİN SHARCİ

Sharcigani waxa uu burinayaa sharci kasta ee Guddi doorasho ka horreeyay.

## QODOBKA 31AAD
## DHAQAN GALKASHARCİGAN

Sharcigani waxa uu dhaqan gelayaa marka uu Golaha Wasiiradu meel mariyo, Baarlamaankuna ansixiyo, Madaxweynuhuna saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawlad Gobaleedka Galmudug.

## LİFAAQA 1AAD:
## DHAQAN WANAAGA LAGA RABO XUBNAHA GUDDİGA DOORASHOOYİNKA İYO HAWL-WADEENADİİSA:

1. Madaxbanaanida iyo dhexdhexaadnimada xubnaha Guddiga:
   B. Xubin kasta oo ka mid ah Guddiga iyo shaqaalahooda waa in ay u gutaan hawshooda si cadaalad iyo dhex-dhexaadnimo ah kuna saleysan daacadnimo, kana maran cabsi gelin kasta ama nacayb iyo eex saameyn ku yeelan karta:

i. Hay’ad kasta oo ka tirsan dawladda.
ii. Xisbi siyaasadeed.
iii. Musharrax doorasho.
iv. Awood kasta oo kale.

T. In uusan isticmaalin ama ka faa’iideysan xogta sirta uu awoodda u leeyahay helitaankeeda maadaama uu ka tirsan yahay Guddiga.

J. In uusan siinnin dhinac sedexaad ama shaqsi aanan ka mid ahayn Guddiga xog ama macluumaad la xiriira hawl-gudashadooda.

X. In uusan ku dhaqmin waxyeelo wax u dhimi karta madaxbanaanida Guddiga.

Kh. In uu ku dhawaaqo ama ka mid noqdo hadal-jeedin si toos ah ama dadban halisgalin karta hufnaanta iyo dhexdhexaadnimda Guddiga.

**2. Xirfad wanaag**

1. Xubin kasta oo ka tirsan Guddiga iyo hawl-wadeenadiisa waa:

B. In ay u gudato xilkeeda sida ugu wanaagsan ee ay ku hanan karto kalsoonida ay dadweynuhu ku qabaan Guddiga.

T. In ay ula dhaqanto dadweynaha si sharaf iyo ixtiraam ku dheehan tahay.

J. In ay u gudato xilkeeda si xirfad wanaag ay ku dheehan tahay iyada oo raacaysa sharcigan.

X. In ay ixtiraamto xuquuqda iyo xuriyaadka dhammaan muwaadiniinta.

KH. In ay ka fogaato ku xooleysi Sharci Darro ah

2. Xubin kasta oo ka mid ah Guddiga iyo hawl-wadeenadiisa waa:

B. In aysan si sharci darro ah u isticmaalin xilka si ay uga faa’iideysato ama ugu faa’iideeyso cid kale.

T. In aysan qaadan ama waydiisan hadiyad cid kasta oo dan hawleed ka leh xafiiska Guddiga.

J. In aysan siinnin xog ama macluumaad ay hayso oo ay ugu faa’iideyso ama uga faa’iidaysato cid kale.